Boplats Syd

# Xeerarka safka- iyo dhexdhexaadinta/xiriirinta

Wuxuu khuseynayaa laga bilaabo 29 janaayo  2026

Boplats Syd

## Ka kooban


1 Xeerarka safka ... 3
1.1 Xeerarka aasaasiga ah ee safka lagu geleyo Boplats Syd ... 3
1.2 Diiwaangelinta safka guryaha ... 3
1.3 Sidan ayaa xogtaada shakhsi ahaaneed loo maaraynayaa ... 3
1.4 Wakhtiga safka ... 4
1.5 Isticmaalka koontada "Mina sidor" ... 4
1.6 Qofka kula soo sodsanaya guriga ... 4
1.7 Dhaxalka wakhtiga safka ... 5
1.8 Gebogebeynta koonto la isticmaalo ... 5
1.9 Gebogebeynta koontada qofka guri la codsanaya qof kale (medsökande) ... 5
1.10 Haddii aanu annagu la wareegno guryo kale oo saf loogu jiro ... 5
1.11 Markaad Haa tiraahdo marka guri lagu tuso kadib ... 6
1.12 Wakhtaaga safku wuxuu noqonayaa eber haddii lagu siiyo heshiis guri kiro ah ... 6
2 Lacagta safka ... 6
2.1 Waxaad bixinaysaa kharashka safka sannad kasta ... 6
2.2 Wax kharash ah ma bixinayo qofka kale ee kula codsanaya guriga ... 6
2.3 Haddii aad ku bixin waydo wakhtiga loogu talagalay ... 6
2.4 Haddii aad rabto in lacagtaada kharashka safka laguu soo celiyo ... 6
3 Xeerarka ku saabsan habka guryaha loo qaybiyo ... 7
3.1 Sidan ayaa lagu go'aamiyaa qofka loo soo jeediyo inuu guriga kiraysto ... 7
3.2 Hayso wakhtigaaga safka (Behåll din kötid) ... 7
3.3 Waa inaad buuxisaa shuruudaha si laguugu oggolaado ... 7
3.4 Wax shuruudo oo midabtakoor ah lama ogola in la sameeyo ... 8
3.5 Shuruudaha looga baahan yahay helitaanka guryaha dadka waayeelka iyo guryaha ammaanka ... 8
3.6 Shuruuda inaad si joogto ah u deggenaato guriga ... 8
3.7 Xogtaada iyo kaantaroolkayaga ... 8
3.8 Raadinta guriga ... 9
3.9 Tusidda guryaha ... 9
3.10 Shuruudaha lagu soo jeedinayo inaad tahay qofka guriga kireysanaya ... 10
3.11 Qof dammiin ah, raasamaal iyo deebaaji ... 10
3.12 Haddii aad ku xadgudubto nidaamka, waxaa lagu siin doontaa digniin ... 10
3.13 Haddii aad jebiso sharciyada, waxaa lagaa xirayaa inaad codsato guryo ... 10
3.14 Warbixino aan run ahayn ... 11
3.15 Waxaad ku qasban tahay jawaabtaada Haa ... 11
3.16 Khalad yimaada gudagalka arrinta ... 11
3.17 Arrimaha shaqaalaha ... 11
3.18 Haddii aad cabasho qabto ... 12

# 1 Xeerarka safka

Xeerarka safka ee Boplats Syd waxay ka kooban yihiin xeerar aasaasi ah oo loogu talagalay safafka guryaha, safafka waqtiyada, kharashka safka iyo dhexdhexaadinta/xiriirinta.

Marka laga reebo xeerarkan aasaasiga ah, waxaa jira shuruudo u baahan in la buuxiyo si loo raadsado loona helo guri. Shuruudahani waxay ka muuqdaan xayaysiisyada guriyaha ee kala duwan.

## 1.1 Xeerarka aasaasiga ah ee safka lagu geleyo Boplats Syd

- Waxaad safka guryaha geli kartaa laga bilaabo maalinta aad buuxiso 16 sano
- Waad ku khasban tahay inaad bixiso kharashka loogu talagalay safka ee sannadlaha ah
- Diiwaangelintaadu waa mid shakhsiyeed

## 1.2 Diiwaangelinta safka guryaha

Markaad safka guryaha geleyso, waxaad u baahan tahay inaad qorto toban lambarka (personnummer), magaca, lambarka telefoonka iyo cinwaanka iimeylka.

Haddii aanad lahayn ciwaanka iimayl oo kuu gaar ah, waxa laguu siinayaa ciwaan khiyaali ah. Kan iimaylkan looma isticmaalayo si lagugula xiriiro adiga.

Waxaa laguugu soo diri karaa iimeyl qof aad wakiil ka dhigatay iimeylkiisa haddii aad diiwaangeliso cinwaanka iimeylka wakiilka.

Haddii aanad haysan tobanka lambar ee iswidhishka (personnummer) waxaad taa beddelkeeda gelinaysaa taariikhda dhalashadaada (sannadka, bisha, maalinta).

Markaad isdiiwaangeliso, waxaad oggolaatay in ay Boplats Syd kaydiyaan oo ay isticmaalaan xogtaada shakhsi ahaaneed ee ku jirta xogta kumbiyuutarka Boplats Syd. Boplats Syd waxay raacaan xeerka ilaalinta xogta (GDPR) waxayna si guud u maareeyaan macluumaadka shaqsiga iyadoo ku salaysan sharciga aasaaska ah ee ku saabsan danta guud. Tani waxay ku salaysan tahay hawsha ka shaqaynta guryaha ee degmada iyo in shirkadu tahay hey'ad degmo.

Markaad bixiso lacagta safka, waxaad dhammaystiri kartaa diiwaangelintaada. Markaad buuxiso dhammaan macluumaadka khasabka ah, waxaad bilaabi kartaa inaad raadiso guri.

## 1.3 Sidan ayaa xogtaada shakhsi ahaaneed loo maaraynayaa

Waxaanu si joogto ah u hubin doonaa ciwaanka kaaga diiwaangashan iswiidhiska oo aanu ka cusboonaysiin doono xogta kaaga qoran Hey'adda cashuuraha dadweynaha. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in dhammaan macluumaadka kale ee adiga kugu saabsani inay yihiin kuwo sax ah oo markaa taagan. Gal "Mina sidor" haddii aad u baahan tahay inaad wax cusboonaysiiso ama aad beddesho. Macluumaadkan soo socda ayaa si gaar ah muhiim u ah:

- Lacagta ku soo gasha wakhtigan xaadirka ah
- Goobta shaqada
- Mulkiilaha guriga hadda oo uu la socdo macluumaadka guriga hadda (Mulkiilaha guriga, ururka guryaha is-kaashatada, qofka guriga gacanta koowaad ku qoran ama wax la mid ah)
- Muddada suurtagalka ah ee degganaanshaha
- Tirada dadka waaweyn iyo carruurta ku noolaan doona guriga
- Iimeylka
- Lambarka telefoonka
- Haddii ay jirto cid kale oo kula codsadanaysa guriga
- Haddii aad waxbarasho ku jirto
- Haddii aad rabto boostada caadiga ah iyo haddii kale
- Haddii ay jiraan calaamado ah lacag-bixin la'aan (betalningsanmärkningar) ama deymo

Boplats Syd

Marka aad noqoto qof u qalma in la siiyo guri, Boplats Syd waxay xaqiijin doontaa dukumintiyada aad soo gudbisay si ay u aragto dakhliyadaada.  Waxaanu hubin doonaa diiwaankaaga iyo tirada xubnaha qoyskiina.

Waxaanu baari doonaa xaaladaada dhaqaale oo waxaanu hubin doonaa haddii aad leedahay calaamado lacag-bixin la’aan ah ama deymo inta aan laguu tixgelin heshiis kirada guriga ka hor.

Waxaanu cusboonaysiinaynaa macluumaadkaaga diiwaangashan marka aanu samayno koontoroolka kadib, laakiin dukumentiyadaada iyo natiijooyinkaaga baaritaannada waxaa la kaydin doonaa muddo xaddidan oo keliya. Sidaa darteed waxaad si joogto ah u cusboonaysiin doontaa dukumentiyadaada haddii aad raadinayso dhowr guri.

## 1.4 Wakhtiga safka

Wakhtigaaga safka waxa lagaaga bilaabayaa maalinta aad lacagta safka bixiso oo ay lacagtu ku soo dhacdo koontada bangiga Boplats Syd. Wakhtiga safku waa mid shakhsi ahaaneed. Ma siin kartid wakhtigaaga safka qof kale. (eeg sidoo kale1.7)

## 1.5  Isticmaalka koontada ”Mina  sidor”

Waxaad galeysaa boggayaga  www.boplatssyd.se.  Bogga "Mina sidor" waxa aad ka samayn karto waxaa ka mid ah:

- Inaad ka raadsato guryaha firaaqada ah
- Inaad soo geliso dukumentiyadaada
- Ku soo jawaab Haa/Maya haddii lagugu martiqaado guriga lagu  tusayo
- Ku soo jawaab Haa/Maya haddii aad wali sii xiisaynayso marka guriga lagu tuso  ka dib efter
- Akhri warbixinta aanu kuu soo dirno annagu
- Bixi  kharashka safka
- Inaad soo martiqaado, u oggolaato oo aad ka saarto qofka guriga kula codsanaya

Kuma soo codsan kartid guri bannaan ama kuma soo odhan kartid HAA/MAYA guri bannaan adigoo iimeylka isticmaalaya. Taas waad inaad ka samayso bogga "Mina sidor" ama booqasho/telefoon inta lagu jiro saacadaha uu xafiisku furan yahay .

Waxaad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso xogtaada diiwaangashan ugu yaraan 6dii biloodba hal mar. Haddii aadan taa samaynin, ma awoodi doontid inaad isku diiwaangeliso guri aad xiisaynayso. Haddii aad samaysay inaad guryaha la socoto, waxaad u baahan tahay inaad soo xaqiijiso ugu yaraan 6dii biloodba hal mar inaad doonayso inaad sii haysato. Haddii aadan taas samaynin, indho ku haynta guryaha waa la soo gebogebeynayaa.

## 1.6 Qofka kula soo sodsanaya guriga

Haddii aad tahay qof guri la codsanaya qof kale, laakiin aanad lahayn koonto kuu gaar ah, waa inaad samayso diiwaangelin adiga kuu gaar ah.  Haddii aad isku diiwaangeliso inaad tahay qof guriga la codsanayo qof kale, ma bixinaysid kharashka safka. Waxaa lagu siinayaa koonto adiga kuu gaar ah laakiin laguma siinayo wakhtiga saf ah oo adiga kuu gaar ah.

Haddii aad tahay qof guri la raadsanaya qof kale oo aad isla degeysaan guriga aad raadinaysaan, waxaa lagama maarmaan ah inaad ku xirto koontadaada, qofka guriga isagu codsanaya.  Haddii aad qof codsade rasmi ah isku xiran tihiin ka dib marka la gudbiyey codsiga xiisaha guriga, markaas laguuma tixgelin doono inaad tahay qofka labaad ee la codsanaya guriga la codsanayo.

Bogga "Mina sidor" waxaad ka ansixinaysaa inaad rabto inaad tahay qof labaad ee guri qof kale la raadsanaya. Hal qof oo keliya ayuun baad guri la raadsan kartaa.

Waxaad mar walba u beddeli kartaa koontadaada aad qofka la codsanayso oo aad ka dhigaysaa koonto codsade ah, si aad u  urursato wakhti saf oo aad adigu leedahay, adigoo si toos ah uga bixinaya kharashka safka bogga “Mina sidor”

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in dhammaan macluumaadka kale ee adiga kugu saabsan inay yihiin kuwo sax ah oo markaa taagan. Tusaale ahaan, haddii dakhligaagu isbeddelo ama haddii aad

beddesho cinwaankaaga iimeylka, waxaad u baahan tahay inaad bogga gasho oo aad beddesho warbixintaada.

Si aad labadiinuba awood ugu yeelataan inaad ku qornaataan heshiiska guriga, qofka kula codsanayana sidoo kale waa la koontarooli doonaa. Sidaas darteed, waa inaad bogga soo gelisaa dukumentigaaga muujinaya dakhligaaga hadaad tahay qofka labaad ee la codsanaya, waxaany samayn doonaa baaritaan dhinaca deynta iyo lacag-bixinta ah.

Qofka la codsanaya qof kale guri laguma wareejin karo wakhtiga safka ee codsadaha. (sidoo kale eeg 1.7)

Haddii aad rabto inaad ku qornaato qof guri la codsanaya qof kale oo aad leedahay koonto adiga kuu gaar uma baahnid inaad samaysato diiwaangelin cusub.   Bogga "Mina sidor" waxaad ka ansixinaysaa inaad rabto inaad tahay  qof guri qof kale la raadinaya.

Haddii laba qof oo guri raadsanayaa ay isku xiran yihiin, waxay si otomaatig ah isugu noqonayaan dad guri isla raadsanaya. Markaa khasab ma aha inay labada dhinacba codsi soo diraan.  Hal qof oo keliya ayuun baad guri la raadsan kartaa.

## 1.7  Dhaxalka wakhtiga safka

Haddii codsadaha guryuhu dhinto, ama u guuro hoy daryeel caafimaad oo joogtada ah, seyga/xaaska ay isla noolaayeen (sida uu qabo sharciga wada noolaanshaha) ayaa dhaxli kara wakhtiga safka. Si wakhtiga safka loo wareejiyo, waa khasab inuu qofku
qofkii/dadkii qaraabada ahaa ee guriga ku haray waa inay ku diiwaangashanaayeen isla ciwaanka codsadaha guriga lixdii bilood ee la soo dhaafay waxayna la xidhiidhayaan Boplats Syd ugu dambayn lix bilood ka dib dhimashada ama marka qofka la geeyo guri daryeel caafimaad oo lagu haynayo.

Waa marka keliya ee wakhtiga safka qof kale lagu wareejin karo. Qofka kale ee la codsanaya guriga ee aan ahayn seyga/xaaska ama dad wada deggenaa (sida uu qabo sharciga wada noolaanshuhu) weligood ma dhaxli karaan wakhtiga safka.

## 1.8 Gebogebeynta koonto la isticmaalo

Haddii aanad rabin inaad ku sii jirin safka guri raadinta, waxaad ka gebogebeyn kartaa  isticmaalka koontadaada bogga "Mina sidor". Sidoo kale ma bixinaysid kharashka safka ee sannadlaha ah inta aanu bilaabmin xilliga lacag bixinta ee soo socota ka hor.

Markaad ka baxdo safka guri raadinta, koontada aad isticmaasho waa la tirtirayaa oo laguuma soo celinayo wakhtigaagii safka. Haddii aad doorato inaad is-diiwaangeliso mar kale, waqtigaaga cusub ee safka wuxuu ka bilaaban doonaa marka lacag bixintaada aanu annagu diiwaangelino.

Koontadaada waxaa la joojin doonaa  marka:

- Aad adigu koontada ka xidho bogga mina  sidor
- Aanad adigu bixin lacagta kharasha safka 60 maalmood gudahood diiwaangelintaada  ugu horreysa kadib
- Aanad bixin kharashka safka lix bilood gudahood marka la bixinayo kharashka safka ee sannadlaha ah kadib
- Hadaad dhimato oo aanu ka ogaano markaano ka hubino  diiwaangelinta dadweynaha kadib

## 1.9  Gebogebeynta  koontada qofka guri la codsanaya qof kale (medsökande)

Haddii aad ku diiwaangashan tahay inaad tahay qof guri la codsanaya qof kale, adiga ayaa ka tirtiri kara koontada la codsadaha bogga "Mina sidor". Koontadaada sidoo kale si otomaatig ah ayaa loo tirtiri doonaa 90 maalmood kadib haddii aanad ku xirnayn qofka codsanaya guriga.

## 1.10 Haddii aanu annagu la wareegno guryo kale oo saf loogu jiro

Haddii Boplats Syd ay la wareegto guryo kale oo saf loogu jiro oo mulkiile kale leeyahay, taas waxaa lagu nidaaminaya heshiis gaar ah oo u dhexeeya Boplats Syd iyo mulkiilaha guryaha. Dadka ku jira safka guryaha ee shirkada kale, tusaale ahaan, waa loo oggolyahay inay wakhtigoodii safka u soo qaataan markay u soo guurayaan safka guryahayaga.

### 1.11 Markaad Haa tiraahdo marka guri lagu tuso kadib

Haddii aad "HAA" ku jawaabto xiisahaaga marka guri lagu tuso kadib oo aad noqoto lambarka 1, dhammaan codsiyada xiisaha aad guryaha kale u muujisay si otomaatig ah ayaa loo tirtiri doonaa.

### 1.12 Wakhtaaga safku wuxuu noqonayaa eber haddii lagu siiyo heshiis guri kiro ah

Markaad saxiixdo heshiis kiro guri, waad sii haysanaysaa koontadaada isticmaalka, laakiin wakhtiga safkaagu wuxuu noqon doonaa eber. Wakhtiga safkaaga cusub waxa la xisaabinayaa laga bilaabo maalinta aad u soo guurto gurigaaga cusub. Haddii aad kala soo wareegto wakhtiga safka shirkad kale oo saf lagaga jiro, wakhtiga safka waxa sidoo kale laga dhigi doonaa eber.

Waa laguu ogolyahay inaad haysato wakhtigaaga safka haddii aad saxiixday heshiis guri oo aan lahayn ilaalin mulkiyadeed (besitningsskydd), tusaale ahaan guryaha ardayda ama heshiisyo wakhti xaddidan (heshiis muddo gaaban ah). Sidoo kale, waxaad haysan kartaa muddada aad safka ku jirtay haddii aad saxiixday heshiis kiro guri ah oo lagugu siiyay nidaamka Hayso muddadaada safka (eeg qaybta 3.2.)

## 2 Lacagta safka

### 2.1 Waxaad bixinaysaa kharashka safka sannad kasta

Waxaad bixinaysaa kharashka safka sannadkii hal mar si aad ugu jirto safka guryaha. Hoggaamiyeyaasha degmada Malmö ayaa go'aaminaya kharashka. Laga soo bilaabo 2009, kharashku waa 300 kr sannadkii.

Marka ay gaadho wakhtiga bixinta lacagta, waxa lagu xusuusin doonaa kharashka marka aad gasho bogga "Mina sidor" www.boplatssyd.se. Waxaanu sidoo kale kuugu soo diraynaa warqadda lacagta lagu bixiyo cinwaankaaga iimaylka ama ciwaanka diiwaangelinta dadweynaha.

Haddii aad doorato inaad ku bixiso Autopay, khidmadda safka si toos ah ayaa looga jarayaa kaadhkaaga 30 maalmood ka hor intaanu dhammaan wakhtigii lacag bixintu. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in macluumaadka kaadhka la cusboonaysiiyey iyo inay suurtogal tahay inay lacagi ku jirto koontada si kaarka lacagta looga jaro marka la gaaro waqtiga.

Adiga ayaa ka mas'uul ka ah inaad hubiso in kharashkaaga la bixiyey xitaa haddii warqadda lacag bixintu aanay ku soo gaarin. Waxaad u baahan tahay inaad iska hubiso inaad ku bixisay kharashka wakhtigii loogu talagalay sannad kasta.

### 2.2 Wax kharash ah ma bixinayo qofka kale ee kula codsanaya guriga

Qofka guri la codsanaya qof kale ma bixinayo kharashka safka. Sidaa darteed laguma siinayo wakhti saf oo adiga kuu gaar ah.

### 2.3 Haddii aad ku bixin waydo wakhtiga loogu talagalay

Markaad is-diiwaangeliso marka ugu horeysay, waxaad haysataa 60 maalmood oo aad ku bixiso. Wakhtigaaga safka waxa lagaaga bilaabayaa maalinta aad lacagta safka bixiso oo ay lacagtu ku soo dhacdo koontada bangiga Boplats Syd. Haddii aadan ku bixin wakhtigii loogu talagalay, koontada aad isticmaasho waa la tirtiri doonaa.

Haddii aad leedahay koonto aad isticmaasho oo loo baahdo in la cusboonaysiiyo, waxaad haysataa 60 maalomood inaad ku bixiso lacagta. 60 maalmood waxa laga soo bilaabayaa markii ugu dambaysay ee uu dhammaaday wakhtigii aad lacagta bixisay. Haddii aad ku bixiso lacagtaada safka wakhtigii loogu talaglay, waxaad sii haysanaysaa koontadaada isticmaalka waxaanad haysan kartaa wakhtigaaga safka. Inta aanad bixin lacagta koontada isticmaalka ma raadsan kartid guryo. Haddii lacag-bixinta aanay ku helin Boplats Syd 60 maalmood gudahood, koontadaada isticmaalka waa la joojin doonaa oo waxaad waayi doontaa wakhtigaaga safka.

Waa ikhtiyaari in safkayaga la galo, sidaa daraadeed kuuma soo dirayno waraaqaha dalabka ama uma sii gudbinayno sheegashada deynta ururinta (inkasso).

### 2.4 Haddii aad rabto in lacagtaada kharashka safka laguu soo celiyo

Waxaad xaq u leedahay 14 maalmood oo ah ka-noqosho ah marka aad bixiso khidmaddaada safka marka ugu horeysay. Muddada ka noqoshadu waxay bilaabmaysaa laga bilaabo maalinta ay lacagtu annaga na soo gaarto.

Haddii aad horey isugu diiwaangelisay inaad xiisaynayso guri, waxaad lumi doontaa xaqaaga ka noqoshada.

Xaq uma lihid inaad dib uga noqoto kharashyada safka sanadka ku xiga, maadaama heshiiska adiga iyo Boplats Syd idiin dhexeeyey uu ku jiro bixinta lacagta ugu horreysa.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka noqoto lacag bixinta adigoo email ugu soo diraya info@boplatssyd.se adigoo fariin cad soo raacinaya oo muujinaysa inaad ka qoomamaysay lacag bixintii. Marka aad ka noqoto, waxaanu xiri doonaa koontada aad isticmaasho.

# 3 Xeerarka ku saabsan habka guryaha loo qaybiyo

## 3.1 Sidan ayaa lagu go'aamiyaa qofka loo soo jeediyo inuu guriga kiraysto

Boplats Syd waxay leeyihiin saf toos ah. Taas macneheedu waxa weeye in dhammaan guryaha loo bixiyo si waafaqsan wakhtiga safka. Codsadaha guriga ee ugu wakhti dheer wakhtiga safka dadka soo dalbaday guriga ee buuxiyey shuruudaha mulkiilaha guriga ayaa helaya guriga.

Guriga bannaan waxa lagu soo xayaysiinayaa websaydkayaga, inta badan inta u dhaxaysa saddex ilaa toddoba maalmood. Qofka guri raadinaya ee bixiyey kharashka safka wuxuu codsan karaa guryaha uu soo buuxiyo shuruudaha mulkiilaha guriga.

Haddii ay jiraan dhowr qof oo hal guri isla codsaday oo waqtiga safkooduna isku mid yahay, qofka marka ugu horeysa isku diiwaangeliya gurigaas ayaa safka ugu horeyn doona.

## 3.2 Hayso wakhtigaaga safka (Behåll din kötid)

Guryaha qaarkood waxaa lagu bixin karaa habka Haysashada wakhtiga safka. Markay noqoto nidaamka Hayso wakhtigaaga safka, guriga waxaa lagu bixiyaa iyadoo la raacayo muddada safka, laakiin waxaa sii haysanaysaa wakhtigaagii safka xitaa marka aad saxiixdo heshiis kiro guri ka dib.

Si guriga loogu bixiyo habka Hayso wakhtigaaga safka, waa in markii hore lagu xayeysiiyay saddex jeer oo kala duwan barta Boplats Syd, ama shirkada kale oo guryaha kiraysa oo la mid ah ay sidaa samaysay iyadoo aan wax heshiis kiro ah lagu saxiixin.

## 3.3 Waa inaad buuxisaa shuruudaha si laguugu oggolaado

Waa mulkiilaha guriga qofka go'aaminaya shuruudaha in adiga loogu oggolaado inaad noqoto kiraystaha guriga cusub. Mulkiiluhu, wuxuu tusaale ahaan codsan karaa:

- Nooca uu yahay dakhliga adiga ku soo galaa
- Intee in leeg ayaa lagaa rabaa inuu noqdo dakhligaagu
- Immisa qof ayaa la ogolyahay inay ku noolaan karaan guriga
- Da'dee ayaad u baahan tahay inaad r noqoto

Shuruudaha la duldhigayo codsadayaasha guryuhu way ku kala duwanaan karaan guryaha kala duwan iyo noocyada kala duwan ee guryaha, laakiin lama beddeli karo guri gaar ah inta ay socoto hawsha meelaynta gurigu.

Waxaa jiri kara shuruudo gaar ah oo lagu dabaqi karo guryaha sida guryaha ardayda, dhalinyarada, iyo guryaha dadka waayeelka ah, ama guryaha sida gaar ah loogu talagalay dadka ka soo wareegay saf guryo kale kuwaas oo aanu annagu la wareegnay.

Arrintani sidoo kale waxay khuseyn kartaa guryaha marka hore la siiyo dadka guri raadinaya ee horey u degan guryo uu leeyahay isla mulkiilaha gurigu. Mulkiilayaasha guryuhu waxay xaq u leeyihiin inay kireeyaan saddexdii guriba hal guri oo ay ka kireeyaan kireysteyaal ay iyagu leeyihiin.
Guryahan waxa gacanta koowaad la siinayaa dadka hore u deggenaa guryaha mulkiilaha guriga ee

haysta heshiiska gacanta koowaad. Shuruudaha khuseeya ee loo baahan yahay waxa laga heli

karaa in laga akhristo xayaysiisyada guri kasta ee boggayaga internetka.

Haddii aadan buuxin shuruudaha kiraystaha guriga marka aanu eegno xogtaada iyo dokumentiyadaada, waxay ka dhigan tahay in **aanad**;

- codsan karin guriga
- aan lagugu soo casuumi doonin tusida guriga
- aan lagu siin doonin heshiis guriga

Qofka guri raadinayaa waa inuu mar walba buuxiyaa shuruudaha mulkiilaha guriga. Haddii dakhliga bishii ku soo galaa aanu ku filneyn, oo uu koontadaada ku xiran yahay qofka kale oo guriga kula codsanayaa, waxaad ku xisaabin kartaa dakhliga bishii soo gala qofka kale ee kula codsanaya guriga. Laakiin taasi waxay ka dhigan tahay inaad wada degi doontaan guri aad idinku wada raadinaysaan.

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha mulkiilaha guriga adiga oo isku daraya dakhligaaga iyo dakhliga qofka kula codsanaya, waxa kale oo loo baahan yahay inuu buuxiyo qofka guriga kula codsanayaa shuruudaha mulkiilaha guriga iyo sidoo kale shuruudaha ku saabsan calaamadaha lacag-bixinta iyo deymaha.

Haddii aad ku xiran tahay qof kale oo kula codsanaya guri kadib markaad muujisay inaad xiisaynayso guriga, markaa laguma xisaabinayo qofka kula codsanaya gurigan .

Haddii aad doorato inaad ka saarto meesha qofka kula codsanaya guriga, waa inaad adigu buuxisaa shuruudaha milkiilaha guriga. Haddii aad keligaa buuxin waydo shuruudaha, laguuma oggolaan doono guriga markaa khuseeya.

## 3.4 Wax shuruudo oo midabtakoor ah lama ogola in la sameeyo

Shuruudaha mulkiilaha gurigu waa inay u hoggaansamaan xeerka midabtakoorka. Taas macnaheedu waxay tahay in dadka aan loola dhaqmin jinsiga ay ka soo jeedaan, aqoonsiga jinsiga, qowmiyadda uu yahay, diinta, naafanimada, nooca galmada uu yahay ama da'da. Shuruudaha da'da waa loo ogolyahay inay ka dhacaan guryaha qaybta sida dhalinyarada, waayeelka ama guryaha ammaanka ah.

Guryaha loo qoondeeyey baahiyaha gaarka ah, waxaa jiri kara shuruudo gaar ah oo ku saabsan baahida/naafannimada.

## 3.5 Shuruudaha looga baahan yahay helitaanka guryaha dadka waayeelka iyo guryaha ammaanka

Guryaha dadka waayeelka iyo guryaha ammaanka loogu talagalay waxaa lagu bixiyaa iyadoo la raacayo muddada safka, iyadoo ay shardi tahay in qofka codsanaya iyo qofka la-codsanayaaba ay soo buuxiyeen shuruudihii mulkiilaha guri, sidoo kalena ay gaareen da'da uu mulkiiluhu rabo inay noqdaan.

## 3.6 Shuruuda inaad si joogto ah u deggenaato guriga

Marnaba lama ogola inaad qof kale u gasho safka ama aad u raadiso guriga adigu. Si guri lagaaga siiyo Boplats Syd, waa inaad u soo guurtaa, isku diiwaangelisaa oo aad si joogto ah u deggenaataa guriga.

Haddii aad guri qof kale si wadajir ah u wada raadsataan, labadiinuba waa inaad u soo wada guurtaan, isku diiwaangelisaan, oo si joogto ah ugu wada noolaataan gurida aad raadinaysaan.

## 3.7 Xogtaada iyo kaantaroolkayaga

Adiga ayaa mas'uul ah inaad hubiso in aanu annagu helno macluumaadka saxda ah ee omadiga kugu saabsan.

Annaga oo la xiriirayna diiwaanka dadweynaha, hey'adda qasab ku ururisa lacagaha deymaha (kronofogdemyndigheten) iyo rugta amaahda (kreditinstitut), waxaanu hubin doonaa in macluumaadkaaga diiwaangashani ay sax yihiin.

Waxaanu cusbooneysiinaynaa:

- Ciwaankaaga ka diiwaangashan Hay'adda

Cashuuraha (Skatteverket). Waxaanu

hubinaynaa haddii aad:

- Buuxinayso shuruudahamulkiilaha guriga
- Aad leedahay  calaamadaha lacag-bixinta la'aanta
- In lagaa helay isku-day hantidaada lagula wareegayo  oo diiwaangashan
- Aad leedahay  deyn cafis
- Haddii lagugu leeyahay deymo kaaga

diiwaangashan Hey'adda qaabilsan qasab ku

ururinta deymaha, Waxaanu annagu sidoo

kale:

- hubinaynaa inta qof ee ku noolaan  doonta guriga
- Waxaanu hubinaynaa dukumeentiyada aad soo gudbisay bogga si aad u muujiso dakhliga  ku soo gala
- In aanu baarno deynta iyo lacag-bixinta dabeecadda aad gadatay  adigu  (kreditupplysning)
- Waxaanu cusboonaysiinaynaa xogtaada diiwaangashan markaanu  koontaroolka samayno kadib

Si loo ansixiyo dukumentiyada aad soo gudbisay, waa in ay si cad uga muuqdaan oo ay u fahmi karaan

Boplats Syd. Mulkiilaha gurigu wuxuu samayn doonaa inuu:

- Hubiyo inaad leedahay deymo ku saabsan kirooyin guri
- Uu ka soo qaado tixraacyo shirkada aad hadda  guriga kaga jirto

Haddii aad qof guri kula codsanaya uu ku xiran yahay koontada aad isticmaasho, waxaanu sidoo kale ku sameyn doonaa baaritaano ku saabsan qofka guriga kula codsanaya. Markaa waa khasan inaad ka codsato qofka guriga kula codsanayaa inuu soo geliyo dukumentiyadiisa bogga.

## 3.8 Raadinta guriga

Had iyo jeer waa inaad adigu raadsato guryaha aad xiisaynayso. Haddii guri lagugu soo casumo, waa inaad "HAA" ku jawaabto waqtiga loo qoondeeyay. Sidaas oo kale waxaa khuseysaa markaad guriga aragto ka dib haddii aad sii xiisaynayso guri weli.
Tani waxay khusaysaa iyada oo aan loo eegin in guriga lagu tuso adigoo soo arkay, lagugu tuso si dhijitaal ah ama aan lagu tusin gebi ahaanba. Haddii aanad HAA kaga jawaabin tallaabooyinkan, codsigaaga xiisaha ee gurigaas si toos ah ayaa meesha looga saarayaa.

## 3.9 Tusidda guryaha

Siyaabo kala duwan ayay u dhici kartaa tusidda guryuhu. Sida caadiga ah ayaa ah inaad soo fiirsato guriga, adiga oo u tegeya qofka guriga aad codsatay deggan ee ka guuraya. Inta badan waxaa jooga shaqaalaha shirkada guriga iska leh marka guriga la tusayo qofka, laakiin ma aha marwalba. Inta badan mulkiilayaasha guryuhu waxay jecel yihiin in adiga ama qof kaa wakiil ah in la arko si laguugu oggolaado inaad tahay kiraystaha guriga. Waxay ku caddahay warqadda martiqaadka tussida guriga inay guri tussidu tahay mid qasab iyo in kale.

Mararka qaarkood suurtagal maaha in la arko guriga. Taasi waxay khusaysaa, tusaale ahaan, guryaha dhawaan la dhisay ama guryaha dabaqyada ee dib loo dhisayo. Markaa waxaa lagu soo bandhigi doonaa sawir naqshadeed (ritning). Sidoo kale, waxaa jira in lagu soo bandhigo si dijitaal ah in loo arko. Markaas waxaad arki doontaa sawirro ama filimaan laga soo sawiray/laga soo duubay guriga.

Haddii aanay jirin inta aad tagto aad soo aragto ama dhijitaalka ahaan u aragto guriga, ha filan in aad aragto guriga inta  aanu dhicin
u guuritaan guriga ka hor. Taas macnaheedu waxay tahay in aad soo tiraahda Haa ama Maya guriga ka dib marka aad aragto qorshaha sawirka ama filimka naqshada ee guriga.

## 3.10 Shuruudaha lagu soo jeedinayo inaad tahay qofka guriga kireysanaya

Si loo soo jeediyo inaad tahay kiraystaha guriga, waa inaad buuxisaa dhammaan shuruudaha mulkiilaha guriga. Haddii dakhliga bishii ku soo galaa aanu ku filneyn, ama haddii aad rabto in qofka kula codsanaya guriga uu ku qornaado heshiiska guriga, waa inuu sidoo kale qofka guriga kula codsanayaa buuxiyo shuruudaha mulkiilaha guriga.

Haddii aad ku xirtan tahay qof guriga kula codsanaya marka aad muujiso xiisaha guri kadib, markaa laguguma xisaabinayo qofka guriga kula codsanaya guryahan.

Haddii aanad bixin macluumaadka saxda ah, ama haddii aanad noo soo jawaabin annaga ama mulkiilaha guriga muddada la sheegay laguma ansaxi doono.

## 3.11 Qof dammiin ah, raasamaal iyo deebaaji

Haddii dakhliga ku soo gala adiga ama qofka kula codsaday guriga aanay buuxin shuruudaha mulkiilaha guriga, mulkiiluhu weli wuxuu ku siin karaa fursad aad ku codsato guri haddii aad tusi karto inaad bixin karto adiga oo keenaya
qof kaa dammaanad qaada Waxay ku caddahay xayeysiiska guriga ee markaa taagan haddii shuruudaha uu mulkiiluhu ku aqbalayo arrimahaas.

Xaaladdaas, mulkiilaha gurigu wuxuu la xidhiidhi doonaa dammaanad qaadaha si uu u hubiyo in dammaanad qaaduhu aanu lahayn cabasho lacag-bixin la'aan ah ama deymo oo uu leeyahay dakhli ku filan oo uu ku dabooli karo kharashyadiisa iyo kharashkaaga guri labadaba.

Waxa kale oo jira mulkiilayaal guryo leh kuwaas oo sidaas oo kale ku siinaya fursad aad ku raadisato guri, isagoo dakhligaagu hooseeyo haddii aad muujin karto inaad leedahay raasamaal ama haddii aad dammaanad ahaan u dhigato lacag u dhiganta dhowr bilood oo kiro ah. Haddii ay taasi suurtogal tahay, waxa lagu sheegayaa xayaysiiska guriga.

## 3.12 Haddii aad ku xadgudubto nidaamka, waxaa lagu siin doontaa digniin

Waa muhiim in hawsha meelaynta guryuhu ay noqoto mid waxtar leh inta suurtagal ah, adiguna aad keento macluumaad sax ah oo adiga kugu saabsan. Haddii aanu ku aragno adiga oo taas ku xad-gudbay waxaa lagu siinayaa digniin. Digniintu ma saamaynayso wakhtiga safkaga. Waxaa lagu siin doonaa digniin haddii:

- Haddii aad ku jirto booska koowaad ee safka hal guri oo aad tiraahdo Haa oo aad muujiso inaad xiisaynayso marka guriga lagu tuso ka dib aad ka noqoto.
- Haddii mulkiilaha gurigu kuu soo diro oo kuu soo jeediyo inaad noqoto kiraystaha guriga, kadibna aad ka baxdo
- Haddii mulkiiluhu kuu oggolaado inaad guri kiraysato laakiin aanad saxeexin heshiiskii guriga
- Aad aad ku qorto macluumaad marin habaabin ah koontada aad isticmaasho

Bogga "Mina sidor" waxaad ka arki kartaa haddii lagu siiyey digniin iyo sababta arrinta laguu siiyey. Haddii aad hesho labo digniin muddo laba- iyo toban bilood gudahood ah, waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato muddo ugu yaraan lix bilood ah, eeg cutubka 3.13.

## 3.13 Haddii aad jebiso sharciyada, waxaa lagaa xirayaa inaad codsato guryo

Sababo kala duwan awgeed, waxaa laga yaabaa in lagaaga xiro inaad guryo ka codsan karto Boplats Syd. Xiritaanka koontada ma saamayno muddada aad safka ku jirtay.

Waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato följande xaaladahan soo socda:

- Haddii aad hesho labo digniin sida ku cad cutubka 3.12 muddo labo- iyo toban bilood gudahood ah, waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato muddo lix bilood ah. Wakhtiga waxa la xisaabinayaa laga bilaabo markaad heshay digniintii ugu dambaysay.
- Haddii aad ka baaqato saddex bandhig guri oo qasab ah, kuwaas oo aad horey u tiri haa, muddo 24 bilood gudahood ah, waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato muddo lix bilood ah. Waqtiga waxaa laga xisaabinayaa laga bilaabo maalintii ugu dambaysay ee aad ka baaqatay bandhigga guriga. Haddii aad ka baaqato dhowr bandhig guri oo qasab ah hal maalin gudaheed, waxaa loo

xisabinayaa inaad hal mar oo keliya ka baaqatay.

- Haddii aad u dhaqanto si xun ama aad ugu hanjabto mulkiilaha guriga, kiraystaha guriga ka guuraya ama shaqaalaha Boplats Syd, waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato muddo labo-iyo toban bilood ah. Haddii xadgudubku uu soo noqnoqdo shan sano gudahood, waxaa lagaa xiri doonaa shan sano. Waqtiga waxaa laga bilaabayaa xadgudubkii ugu dambeeyay. Sidoo kale, had iyo jeer waxaanu u gudbinnaa warbixin booliiska haddii aanu ka shakino in falka uu yahay mid dembi ah.
- Haddii aad leedahay tixraacyo guri oo xun (boendereferenser), mulkiile guri oo gaar ah ayaa kaa xiri kara in aad guryo codsato muddo cayiman.

## 3.14 Warbixino aan run ahayn

Haddii aad dhiibto xog khaldan si aad guri u hesho, waxaa lagaa xirayaa in aad guryo codsato muddo ugu yaraan labo sano ah, ama ilaa inta baaritaanku ka dhammaanayo. Codsiyada xiisaha guryaha ee hadda kuu socda, casuumaadaha bandhigyada guryaha iyo dhammaan hawlaha guryaha ee gacanta lagu hayo waa lagaa tirtiri doonaa. Had iyo jeer waxaanu u gudbinaa dacwad booliiska haddii aanu uga shakino inuu falku yahay dembi.

Bogga “Mina sidor” waxaad ka arki kartaa haddii lagu siiyey digniin iyo sababta arrintaas.

## 3.15 Waxaad ku qasban tahay jawaabtaada Haa

Haddii aad Haa ku jawaabto markaad guri soo aragto kadib, waad ku qasban tahay jawaabtaada Haa. Haddii aad noqoto lambarka 1 ee safka, dhammaan guryaha kale ee aad xiisaynayso si toos ah ayaa meesha looga saarayaa. Waxaanu baadhi doonaa dukumentiyadaada si aanu u hubinno inaad buuxisay shuruudaha mulkiilaha guriga.

Haddii aad noqoto lambarka 1 ee guri aad Haa tiri, ma awoodi doontid inaad samayso codsiyo cusub oo guryo aad ku xiisaynayso.

## 3.16 Khalad yimaada gudagalka arrinta

Haddii Boplats Syd ama mulkiiluhu ay khalad galaan markay arrinta gudageleyaan, oo markaa aanad helin gurigii ay ahayd inaad hesho, waxaa lagu siin doonaa guri u dhigma oo suurtagal ah. Tani waxay khuseysaa oo keliya haddii adiga si khaldan laguula dhaqmay, ee ma khuseeyso haddii aad booska 1 ku heshay qalad aanu ka galnay qof kale oo codsanayay.

Waa inaad taas noogu soo sheegtaa muddo toddoba maalmood gudahood ah. Haddii la arko ina aanu khalad samaynay waxaanu sida ugu dhakhsaha badan ku siin doonaa guri kale oo u dhigma kaas sida ugu macquulsan. Marka la leeyahay la mid ah waxaa loola jeedaa kirada, cabbirka iyo meesha. Shirkada guryuhu (bostadsförmedlingen) iyada ayaa leh mudnaanta turjumaadda waxa loo arko guri la mid ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad tidhaahdo Maya marka guri lagugu soo casumo, waxaanad heli kartaa ugu badnaan laba casumadood oo noocaas ah.

Kiiska magdhowgu ma laha waqtiga kama dambaysta ah, sidaas darteed wuxuu qaadan karaa waqti dheer haddii guri la mid ah aan la bixin karin. Haddii aad hesho guri kale inta aan lagu siinin guri magdhow ah ka hor, kiiska markaa wa la xirayaa.

Adiga ayaa mas'uul ka ah in aanu awoodno si aanu kuula soo xiriirno annaga oo adeegsanayna macluumaadka boggaaga ku jira. Waxaanu xaq u leedahay in aanu xirno kiiska magdhowga haddii aan ku weyno isku-dayo dhowr ah ama muddo sanad ah ka dib.

## 3.17 Arrimaha shaqaalaha

Xitaa shaqaalaha Boplats Syd way iska diiwaangelin karaan safka guryaha waxayna raadsan karaan guri iyadoo la raacayo shuruudo la mid ah kuwa dadka kale ee safka ku jira. Sheefka mas'uulka ah waa inuu oggolaadaa in shaqaalaha, ama qaraabo u dhow qof shaqaale ah, in la soo jeediyo inuu ka kiraysto shirkad guri.

Shaqaalaha Boplats Syd looma oggola inay gudagalaan ku meelaynta guriga (förmedling) ee khuseysa naftooda ama qof qaraabo dhow la ah. Dadka lagu xisaabiyo inay yihiin qaraabo dhow

waa sayga, xaaska, dadka wada deggan, lammaanaha, ilmaha, walaalaha, waalidka iyo waalidka qofka la deggan, lamaanaha, xaaska ama sayga.

## 3.18 Haddii aad cabasho qabto

Haddii aad cabasho qabto, waa inaad la xiriirtaa adeegga macaamiisha ee Boplats Syd ( kundtjänst). Haddii cabashadaadu ay khusayso guri hore loo bixiyey waxaa khuseeya qodobadan soo socda:

1. Marka hore qofka guriga dhexdhexaadiyey ee ka mas'uulka ah ayaa baaraya in meelaynta gurigu ay hab  sax ah u dhacday.
2. Haddii aad rabto in aad horay u sii socoto oo cabashadaada la tijaabiyey waa inaad qoraal soo samayso. Cabashada intaa kadib waxa ka jawaabaya sheefka ay khusayso saddex toddobaad gudahood.
3. Haddii aad diiddo go'aanka qoraalka ah ee laguu soo diray, agaasimaha guud ee Boplats Syd ayaa markaas bixin kara go'aanka kama dambaysta ah ee cabashadaada.

Haddii waxa aad ka cabanaysaa ay ku lug leeyihiin wax ka baxsan sharciyada hadda jira, cabashada waxaa loo gudbinayaa guddiga Boplats Syd. Awood uma lihid inaad racfaan uga qaadato go'aanka guddiga maamulka Boplats Syd meel kale ama heer kale.